

XUQUUQDAADA HOOS TIMAADA MADI-CAL-VDHAGEYSIGA GOBOLKA

Haddii aad ogaysiiskan iyo/ama dukumeentiyo kale ugu baahan tahay Qorshaha iyagoo ah qaab isgaarsiineed oo nooc kale ah sida far waaweyn, farta indhoolayaasha, ama qaab elektaroonig ah, ama, haddii aad rabto in lagaa caawiyo akhrinta qoraalka, fadlan la xiriir Khadka Helitaanka iyo Dhibaataada (ACL) adigoo wacaya 1-888-724-7240.

Haddii aadan weli ku qanacsanayn go'aanka qorshaha, waxaad codsan kartaa "**Dhegeysi Goboleed**" oo garsooraha ayaa dib u eegis ku samayn doona kiiskaaga.

Waa inaad Dhageysiga Gobolka ku codsataa **120 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda warqadan. Si kastaba ha ahaatee, **haddii aad hadda hesho daaweyn oo aad rabto in aad sii waddo helitaanka daaweynta inta aad racfaanka qaadnayso, waa in aad dhagaysi goboleed ku codsataa 10 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda warqaddan la boosto gareeyey ama lagu soo gaarsiiyey AMA ka hor taariikhda qorshahaaga caafimaadka uu sheegay in adeegyada la joojin doono ama la dhimi doono. Markaad codsato Dhagaysi Goboleed, waa inaad sheegtaa inaad doonayso inaad sii wadato helitaanka daawayntaada. Khasab ma ahan inaad bixiso kharashka Dhageysiga Gobolka.

Dhageysiga Gobolka waxaad ku codsan kartaa taleefan, elektaroonig ahaan, ama qoraal ahaan:

- **Taleefa ahaan:** Wac **1-800-952-5253**. Haddii aadan si fiican u hadlin ama aadan wax u maqli karin, fadlan wac **TTY/TDD 1-800-952-8349**.
- **Elektaroonig ahaan:** Waxaad khadka tooska ah ka codsan kartaa Dhageysiga Gobolka. Fadlan booqo websaydka Waaxda Adeegyada Bulshada ee California' si aad u buuxiso foomka eletroonigga ah:
http://acms.dss.ca.gov/acms.page.request.do?page=public.intakeForms#acms_columns
- **Qoraal ahaan:** Buuxi foomka Dhageysiga Gobolka ama warqad u dir:

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California
Qeybta Dhageysiga Gobolka
P.O. Box 944243, Mail Station 9-17-37
Sacramento, CA 94244-2430

Xaqiiji inaad ku qorto magacaaga, cinwaankaga, lambarka taleefankaaga, Taariikhda Dhalashada, iyo sababta aad u rabto Dhagaysi Goboleed. Haddii qof uu ku caawinayo codsashada Dhageysiga Gobolka, foomka ama warqadda ku dar magacooda, cinwaankooda, iyo lambarka taleefanooda. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Khasab ma ahan inaad bixiso kharashka Turjumaanka. Waxaanu kuu raadin doonaa mid.

Xuquuqdaada Dhageysiga Gobolka - Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (DHCS)
Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis 02/07/22

Kadib markaad codsato Dhageysiga Gobolka, waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood in go'aan laga gaaro kiiskaaga oo lagu soo diro jawaab. Haddii aad u malaynayso in sugitaanka muddadaas dheer ay dhaawacayso caafimaadkaaga, waxaa laga yaabaa inaad awood u yeelato inaad jawaab ku hesho 72 saacadood gudahood. Waxaad u baahan kartaa inaad weydiisato dhakhtarkaaga ama qorshaha caafimaadkaaga maskaxda inay warqad kuu qoraan ama adiga ayaa qoran kara. Warqaddu waa inay si faahfaahsan u sharraxdo sida sugitaanka ilaa 90 maalmood ee go'aan ka gaarista kiiskaaga ay si dhab ah u dhaawacayso noloshaada, caafimaadkaaga, ama awooddaada ah inaad gaarto, ilaaliso, ama dib u hesho awood shaqeedka ugu badan. Kadib, xaqiiji inaad codsato "**dhageysi la dedejiyey**," oo keen warqadda aad ku codsanayso dhageysiga.

Wakiil Idman

Waxaa laga yaabaa inaad adigu isku hadasho xilliga Dhegeysiga Gobolka ama qof kale uu kuu hadlo, sida qaraabo, saaxiib, u doode, dhakhtar, ama qareen. Haddii aad rabto in qof kale uu kuu hadlo, markaas waa inaad u sheegtaa xafiiska Dhageysiga Gobolka in qofkaas loo oggol yahay inuu ku hadlo magacaaga. Qofkaas waxaa loo yaqaanaa "wakiil idman."

Caawinaad Sharciyeed

Waxa laga yaabaa inaad hesho caawimaad sharciyeed oo lacag la'aan ah. Waxaad barnaamijka caawimaadda sharciyeed ee degmadaada ka wici kartaa 1-877-734-3258.